

Ma Jebiyaa Soonka?



	Sababka	Xukunka	Cadlimka Fatwooday	Shardi ama shey siyaada eh
1	Inaad ursato ama isticmaashaan barafuun ama uunsi	Soonka ma burayo	Sh ibn Cuthaymin iyo Sh ibn Baz	Isticmaalka vuuniga dhib malaha lakin ma cabbi kartid qiiqa
2	Haddi aad afka ama sankaa ka dhiigto	Soonka ma burayo	Sh ibn Cuthaymin	Waa inaad iska ilaalisaan liqidda dhiigga
3	Isticmaalka daawada neefta oo loo yaqaan 'inhaler'	Soonka ma burayo	Sh ibn Cuthaymin iyo Sh Muqbil	
4	Haddi aad ilig iska soo ridid	Soonka ma burayo	Sh ibn Cuthaymin	
5	Qaadista dhiigga	Soonka ma burayo	Sh ibn Cuthaymin	Soonka wuu buraya haddi ay la mid tahay dhiigga toobidda ama xijaamada
6	Siiqaysiga	Soonka wuu buraya	Sh ibn Cuthaymin	Hadduusan biyo iska soo saarin soonka ma burayo laakin waa inuu towbad keena
7	Dawada sanka lagu dhibciyo	Soonka ma burayo	Sh ibn Cuthaymin	Hadduu dhadhanku gaadho dhhuuama caloosha soonka wuu buraya
8	Dhadhaminta cuntada	Soonka ma burayo	Sh ibn Cuthaymin	Waa inaad isticmaasha caarada carrabka adoo taxaddiran si aadan u liqin
9	San goror	Soonka ma burayo	Sh ibn Cuthaymin	Haddi ay tahay ula kac, soonka wuu buraya
10	Beenta, cayda iyo hadalka xun	Soonka ma burayo	Sh ibn Cuthaymin	Ajarka ayay dhimaysaa
11	Qofka asiga janaabada qabo inoo ku soo kaco (janaabada riyada ama janaabada galimada)	Soonka ma burayo	Lajnadda iyo Sh ibn Baz	
12	Isticmaalka daawada cadayga	Soonka ma burayo	Sh ibn Baz, Sh ibn Cuthaymin, Sh Fawzaan	Qofku inuu iska ilaalivo in uu liqo
13	Mataga	Soonka ma burayo	Sh ibn Baz	Hadduuse iska mantajiyoo soonka wey jabeysaa
14	Isku duubida ama dhunkashada xasqa	Soonka ma burayo	Sh ibn Cuthaymin	Hadii aanay keenin dareen shahwa leh soonka ma burayo. Madhida soonka ma ku burayo
15	Jaritaanka timaha ama ciidiyaha	Soonka ma burayo	Lajnadda	
16	Qubaysiga	Soonka ma burayo	Lajnadda iyo Sh ibn Baz	Liqitaanka biyaha si aan ula kac ahayn soonka ma ku burayo
17	Cilaan saarista	Soonka ma burayo	Sh ibn Cuthaymin	
18	Dabaasha	Soonka ma burayo	Sh ibn Cuthaymin	Ku dabaasha badda iyadoo la sooman yahay waa makruuh
19	Cunista ama cabbitaanka ula kac ah	Soonka wuu buraya	Sh ibn Cuthaymin	Qofkii cuna ama caba isaga oo hilmaamsan, soonka ma burayo
20	Toobidda (xijaamadda)	Soonka wuu buraya	Lajnadda	Nabigu ^و wuxuu yiri: "Qofka la toobaya iyo qofka toobaya labaduba wuu ku buraya soonka" [Saxiix Sunan Abi Daawuud no.2369]
21	Duritaanka suuxinta	Soonka ma burayo	Sh ibn Cuthaymin	
22	Talaalka nafaqada	Soonka wuu buraya	Sh ibn Cuthaymin	Xukunku wuxuu la mid tahay xukunka cuntada
23	Waxyabaha la marsado oo la isku qurxiyo	Soonka ma burayo	Sh ibn Cuthaymin iyo Sh ibn Baz	
24	Dawada indhaha lagu dhibciyo	Soonka ma burayo	Sh ibn Cuthaymin iyo ibn Taymiyyah	Soonka ma burayo xataa hadduu dhhuu gaadho dhadhanku

Su'aalo muhiim ah oo ku saabsan soonka

Goorma ayaa lala imaanaya niyadda soonka?

Nabigu ﷺ wuxuu yiri:

“Qofka niyadda soonka aan soo go'aansan waabariga ka hor, soon uma jiro.”
[Saxiix Sunan Abi Daawuud (no. 2454) iyo al-Irwā’, al-Albānī (no.914)]

Maan saxuurtaa?

Nabigu ﷺ wuxuu yiri: **“Suxuurta, maxaa yeelay waxaa ku jirta barako.”**

[Saxiix al-Bukhaari (no.1923)]

Goormaa ayaa soonka la xirtaa?

Nabigu ﷺ wuxuu yiri: **“Yuusan saxuurta idinka joojinin aadaanka Bilaal iyo caddaanka toosan Aad ku aragtaan cirka, ilaa Aad qorrax ka soo baxa runta ah Aad aragtaan.”** [Saxiix Muslim (no.1094)]

Fadliga ducada qofka sooman wa maxay?

Nabigu ﷺ wuxuu yiri: **“Saddex duco oo aan la diidin: ducada aabo ubadkiisa, ducada qofka sooman iyo ducada qofka safarka ah.”**

[as-Saxiixa al-Albani (no.1797)]

Goorma la afuraa?

Isla markay qorraxdu dhacdo. Nabigu ﷺ wuxuu yiri:

“Dadku fiican waxay ku sugan yihiin inta ay afurka ku degdegayaan.”

[Saxiix al-Bukhaari (no.1957)].

Maxaan ku afuraa?

Anas bin Maadlik wuxuu yiri:

“Rasuulku ﷺ wuxuu ku afuri jiray timirta qoyan intuusan tukan ka hor. Hadii lawaayana timirta caadiga ah, hadii lawaayana biyo.”

[as-Saxiixa al-Albani (no.922)]

Ducada afurka waa maxay?

Cabdullaahi ibn Cumar wuxuu yiri:

“Nabiga ﷺ markuu afura wuxuu ku duceysan jiray:

ذَهَبَ الظُّمَرُ وَابْتَلَتِ الْعُرُوقُ وَثَبَتَ الْأَجْرُ إِنْ شَاءَ اللَّهُ

‘Oonkii wuu tagay, xididadiina wey qoyeen,
ajirkiina wuu sugnaaday in shaa Allaah’”

[Saxiix Sunan Abi Daawuud (no.2357) iyo as-Saxiixa al-Albani (no.920)]